Sanadka waxbarashad 2021/2022




# Dugsi geynta ardayga degmada Sölvesborg

## Maamulka carruurta iyo waxbarashada

Xeerarka degmada Sölvesborg oo dugsi geynta ardayda fasalka ardayda lix sano jirka, iskuulka hoose & dhexe iyo iskuulka ardayda aqligooda gaabsho.

# Waa maxay dugsi geynta ardayga iyo yaa xaq u leh

**Waa maxay dugsi geynta ardayga?**
*(qaraarka dugsi geynta ardayga 1 §)*
Dugsi geynta ardayga waa baabuur oo soo dooni ardayga dhigto fasalka ardayda lix sano jirka, iskuulka hoos & dhexe iyo iskuulka ardayda aqligooda gaabsho oo waxaa laga soo dooni iyo lagu soo celin ciwaanka oo guriga u diwaangalisan iney ku noolyahiin iyo iskuulka. Dugsi geynta ardayga waxaa xita loo isticmaala markey ardayda iskuulkale xisad ku soo dhigan.

**Sharciga iskuulada/xaq u lahaanshada dugsi geynta**
Xerarkan waxey quseeyan ardayda u diwaangalisantahay iney ku noolyahiin degmada Sölvesborg. Dugsi geynta waxey ku qorantahay sharciga iskuulada iyo qaraarka dugsi geynta, oo qodobka 10 qeybta § 32 iyo 11 § 31 oo sharciga iskuulada.

**Xaq u lahaansho dugsi geynta**
Ardayda oo fasalka lix sano jirka, iskuulka hoose & dhexe iyo iskuulka ardayda aqligooda gaabsho oo buuxiyeen shuruuda masaafada, xaalada wadada, curyaanimada ama waxkale oo qaas, waxey xaq u leeyahiin dugsi geynta.

Foomka lagu soo codsado dugsi geynta markey xaalad qaas jirto baa soo buuxin iyo loo soo gudbin Xafiiska carruurta iyo waxbarashada. Tijaabin shaqsi ahaan oo xaalada qaas waxaa suubin shaqaalaha dugsi geyntan.

Ardaygii doorto inuu dhigto iskuul kale aanan eheen kan degmada u qorsheysay ama iskuul shaqsi iska leeyahay ama iskuulka ardayda aqligooda gaabsho ma helaayan dugsi geynta, haddii ey helaayaan xal aan saameyneyn maamulka iyo dhaqliga *(sharciga iskuulada qodobka 10 § 32 2qeyb iyo 10 § 40).*



# Curyaanimo, xaalada wadada iyo masaafada

**Curyaanimo iyo jirro**
Ardayga, u baahan dugsi geyn oo curyaanimo ama jirro sabab u tahay, waa loo oggolaankara.

**Xaalada wadada**
Marka aan qiimeyno xaalada wadada oo wada ardayga soo qaadan waxaan fiirin ilaa heerka gadiidka wadadas isticmaali, xawaaraha ey ku socdan, ballaca wadada iyo habka ey wadadas u dhisantahay, nalalka iftiinka, xilliga jiilaalka iyo waxyaabo kale.

**Masaafada**
Ardayda waxey xaq u leeyahiin dugsi geynta haddii masaafada ka badantahay tirada hoostan ku qoran. Masaafada elektronig ahaan baa loo cabiri iyo wadada ugu dhow guriga iyo iskuulka baa fiirin.

**Fasalka lix sano jirka**
In ka badan 2 km oo guriga iyo iskuulka
**Fasalka 1-3**
In ka badan 3 km oo guriga iyo iskuulka
**Fasalka 4-6**
In ka badan 4 km oo guriga iyo iskuulka
**Fasalka 7-9**
In ka badan 5 km oo guriga iyo iskuulka

Ardayga markuu dhigan fasalka 6 oo iskuulka leh 6-9 isku xiran xerka masaafada waxey ardaygas u noqon sida kuwa dhigto fasalka 7-9. Ardayga waxaa laga soo dooni/lagu soo celin meesha iskuulka go'aamiyan. Meesha laga soo dooni iyo lagu soo celin waxey ahaan meel ku taal wado guud.



# Wakhti la sugi, xilliga imaan iyo xilliga ugu horeyn la soo dooni

Wakhtiyada hoostan ku qoran waa sida la dooni laakiin markasto lama ballan qaadikaro iney sidaa ahan. In wax laga badalo mar laga maarmin waa dhigikarta oo xaalada iskuul ama sugida ammaanka oo lala barbardhigi wakhtiyada dugsi geynta la badsho iyo wakhtiga ardayga u dhaqaaloobi.

- Wakhtiga ugu soo horeyo oo ardayga la soo dooni waa 50 minid markey xilliga iskuulka ka dhimantahay (ma ahan gadiidka bulshada guud qaado).
- Ardayda fasalka lix sano jirka ilaa fasalka 5 waxey iskuulka imaan ugu horeyn markey xisada 20 minid ka dhiman tahay iyo fasalka 6-9 waxey imaan ugu horeyn markey ka dhimantahay 40 minid (ma ahan gadiidka bulshada guud qaado).
- Wakhtiga la sugi qalabtii waa ugu badnaan 20 minid markey xisadii jawdalka ugu dambeysay dhammato oo fasalka lix sano jirka ilaa fasalka 5 iyo 50 minid ardayda fasalada 6-9.

**Marka dugsi geynta dib u dhaco**
Ardayga meesha buu joogi ilaa laga dhaafi xilligii soo doonida, markas kadib buu guriga ku noqon iyo soo wici iskuulka si warbixin loo siiyo.



# Dugsi geynta jiilaalka iyo yaa mas'uul ah

**Dugsi geynta jiilaalka**

Dugsi geynta qofka waa loo oggolaankara xilliga nofembar ilaa bisha maarso, qeyb kamid ah wakhtigas, oo ardayda aan caadiyan xaqa u laheen. Markas waxaa qiimeynta xaalada wadada lagu dari waxyaabaha dhigikaro iyo xilligas sida ey wadada isku badali, oo wadooyinka soo dhuuban, iftiinka iyo aragtida soo yaran, dhulka jidka soo xuman oo sabab u noqon in adkaato in si ammaan loo isticmaalo.

Dugsi geynta xilliga jiilaalka oo ardayga lagu martiqaadi wuxuu ahaan kara baabuurka dugsi geynta, baabuur dugsi geyn dheeri oo xilligas qaas u ah iyo/ama tigid la siiyo uu ku raaco gadiidka bulshada qaado. Wakhtiyada soo doonid iyo soo celinta oo dugsi geynta jiilaalka waa ey ka duwanaankarta iyo u baahnaankarta in lagu waafajiyo dugsi geynta guud. Dugsi geynta waa arrimaha go'aaminteeda iska leedahay Guddiga carruurta iyo waxbarashada. Arrintan ma ahan mid la soo codsan oo dugsi geynta jiilaalka waa mid qofka la siin.

**Mas'uuliyad qeybsashada dugsi geynta oo degmada**

- Wadada u dhaxeyso guriga iyo meesha laga raaci/degan

Waalidka baa mas'uul ka ah ardayga laga soo bilaabo guriga iyo ilaa meesha laga raaci/degan.

- Meesha laga raaci/degan

Waalidka baa mas'uul ka ah ardayga ilaa ayada/asaga ka fadhiisan baabuurka iyo lidkeeda.

- Intuu baabuurka saaranyahay (shirkada lala heshiiyay)

Shirkada baa mas'uul ka ah ardayda intey safarka ku soo jiran laga soo bilaabo markey baabuurka fadhistan ilaa maxaadada iskuulka iyo ilaa maxaadada guriga.

- Maxaadada iskuulka

Iskuulka baa mas'uul ka ah ardayda laga bilaabo markey baabuurka ka soo degtan oo iskuulka iyo inta ey iskuulka joogan oo dhan ilaa baabuurka guriga usoo raacan.



# Labo guri ku kala nool iyo xeerarka

**Labo meel ku kala nool**

Markey isku xaafad iyo labo  xaafad oo kala duwan tahay oo isla degmada xeerka waa sidan:

- Labo guri ku kala nool laga wada in ardayga boqoolkiiba 50 ama 40 ama 60 la noolyahay marba labada waalid oo mas'uulka ka ah laakin kala nool.
- Maamuulka dugsi geynta shaqo kuma lahan kala badalashada labada ciwaan.
- Soo codsashada labo guri ku kala noolanshada wuxuu leeyahay foom qaas.
- Xaq u la ahaanshada waxaa lagu tijaabin labada guri ardayga ku noolyahay.
- Haddi oggolaansho heshid wuxuu ansaxsanaan sanadka waxbarashada lagu jiro kaliya. Codsi cusub oo sanadka waxbarashada cusub waxaad soo gaarsiin Xafiiska maamulka carruurta iyo waxbarashada ugu dambeyn inta eysan dhamman bisha abriil.

**Xeerarka dugsi geynta degmada**

- Dhammaan ardayda dugsi geynta waa in suun xirtan.
- Dirawalka baa mas'uul ka ah in dhammaan ardayda ka yar 15 sano suun u xiranyahay intuusan baabuurka socon iyo kula talin kuwa ka weeyn 15 sano iney isticmaalan suunka.
- Boorsada/boorsooyinka dabarka qofka wuxuu dhigankara dhulka ama saaran kara jilibka.
- Degnaansho iyo nidaam waa inuu lahaado baabuurka.
- Ardayda weey ka mabnuucanyahiin iney taabtan qalabka ku xiran meesha baabuurka laga wado.
- Dhammaan waa in si wanaag leh isku la qabman.
- Wixii baaburka laga jabiyo waxaa bixin waalidka mas'uulka ah iyo marwalba dacwo boliis waa laga suubin.

Haddii arday jabiyo xeerarka korkaan ku qoran midkood ardaygas waxaa canaanan dirwalka. Haddii ardayga diido inuu amarka qaato iyo ardayda kale noloshooda halis galin dirawalka baabuurka wuxuu istaajin meesha ey ku habboontahay iyo la soo xiriiri xafiiska hubinta ammaanka gadiidka oo waxaa dhicikarto in markas ardayda kale loo soo diro baabur kale oo qaado. Dirawalka baabuurka ma sii wadi karo ilaa ardayga amarka fuliyo. Kharashka baabuurka dheeriga waxaa bixin ardayga waalidka mas'uulka ka ah. Arrinta waxaa markas kadib la ogeysiin shaqaalaha isku daba ridaha arrimaha dugsi geynta oo degmada iyo dugsi maamulaha.



# Haddii oo shil dhaco

**Qorshaha xaaladaha adag**

Tilaabooyinka dirawalka qaadi markuu shil dhaco:

- Aragti guud ka qaadan meesha shilka ka dhacay
- Ardayda baska ka saari iyo hal meel iskugu aroorin
- Hubin wixii dhaawac oo jiro
- Qaylo-dhaan diri, wici telefoonka 112
- Caawin haddii qof dhaawacan jiro
- Bannaanka dhigi calaamada saddex geysta oo dhigniinta
- Musaafirka iskugu keeni halmeel iyo xisaabin
- La soo xiriiri shaqaalaha iskuulka iyo shirkada mas'uulka iyo shaqaalaha mas'uulka ka ah dugsi geynta degmada.

Markas kadib waxaa bilaaban in lagu dhaqmo qorshaha xaaladaha adag oo haddii shil bas dhaco.






Xeerka dugsi geynta oo dhameystiran waxaa ka heli
www.solvesborg.se/barnochutbildning.

**Su'aalaha kale**

Elisabeth Björklund, Shaqaalaha dugsi geynta
Degmada Sölvesborg
Telefoon: 0456-81 61 92

Degmada Sölvesborg
Xafiiska carruurta iyo waxbarashada
294 80 Sölvesborg

SÖLVESBORGS
KOMMUN